

Taleefanka: 0300 3000 007

Iimaylka: communityimmunisations.service@nhs.net

Qofka Yar iyo Waalidka / Daryeelaha Qaaliga ah,

Tallaalka Cudurada Burada ee Jirka Bani'aadamka (HPV) si looga difaaco kansarrada kala duwan

Waxaan jeclaan lahayn inaan siino dhammaan dadka da'da yar ee ku jira sannad dugsiyeedka 8 (da'doodu tahay 12 ilaa 13 sano) tallaalka Cudurada Burada Jirka (Human Papillomavirus, HPV) ee dugsiya.

Tallaalka waxaa uu kaa ilaalinayaa ilaa sagaal nooc oo HPV ah, kuwaas oo sababi kara kansaro kala duwan. Waa koorso laba garoojo ah oo lagu qaato cirbad ahaan garabka kore, lix ilaa 24 bilood ayaa u dhaxaysa. Si aad wax badan uga ogaato booqo: www.tiny.cc/hpvleaflet ama daawo animashoonka ku saabsan tallaalka: www.healthforteens.co.uk/health/immunisation

WAX KASTA OO AAD GO'AANSATO, WAA IN AAD NALA SOO WADAAGTAA.

- Ku buuxi foomka oggolaanshaha ONLAYN adiga oo booqanaya: www.leicsandrutlandimms.co.uk
- Dooro **Cudurada Burada Jirka**
- Waxaad u baahan doontaa koodhka dugsiyaaga. Loogu talagalay **Orchard Mead Academy** koodhka dugsiya waa **LE144629**
- **Waxa aad u baahan tahay in aad go'aankaaga soo gudbiso hal mar oo kaliya si aad u hesho tallaalka dhammaystiran.**
- Waxaad heli doontaa iimaylka xaqiijinta marka foomka la gudbiyo.

Miyaad tallaali doontaan foomka oggolaanshaha la'aantiisa?

Maya.

Halkee ayaa ka akhriyi karaa buug-yaraha badeecada tallaalka? Waa goormee kulanka?

Booqo: <https://www.medicines.org.uk/emc/files/pil.7330.pdf>

Dugsiyaaga ayaa kuu sheegi doona taariikhda aanu booqan doono.

Goormee ayaan soo gudbinayaa jawaabcelintayda?

Sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah. Foomka waxa uu xirmi doonaa HAL maalin shaqo ka hor kulanka. Dib ayaan u furi doonaa goor dambe si aad u oggolaato kulamada mustaqbalka.

Waxay leedahay cinwaanka iimaylka ma waafaqsana ama ma aqoonsana koodhka dugsiya.

Xaqiiji in aanay jirin meel bannaan ama xarakayn ka hor ama ka dib cinwaanka iimaylka iyo koodhka dugsiya.

Miyaad foomka ku buuxin weyday onlayn?

Naga soo wac 0300 300 0007 si aad u hesho taageero.

Miyaad beddeshay go'aankaaga?

Nagala soo xiriir adiga oo adeegsanaaya faahfaahinada hoose si aad u cusboonaysiiso go'aankaaga.

Maxaa dhacaya haddii canugayga uu maqan yahay ama xanuunsan yahay maalinta kulanka?

Waa maxay barnaamijka tallaalka qaranka?

Waxaan qabaa su'aalo ama waxaana jeclaan lahaa inaan ka hadlo taageero dheeraad ah, yaan la xiriiri karaa?

Fursad dheeraad ah ayaa diyaar looga dhigi doonaa tallaalka.

Booqo: www.nhs.uk/conditions/vaccinations si aad wax badan u ogaato.

Naga soo wac 0300 300 0007 ama iimaylka communityimmunisations.service@nhs.net

Daacadnimadaada,

Barnaamijka Tallaalka ee Da'da Dugsiga
Adeegga Tallaalka Bulshada

Helitaanka:

Haddii aad jeclaan lahayd inaad luqad kale ku akhrido warqadan, booqo:

www.leicspart.nhs.uk/communityimms

Carabi ذا كنت ترغب في قراءة هذه الرسالة بلغة أخرى، قم بزيارة موقعنا على الإنترنت

Gujarati જો તમે આ પત્ર ગુજરાતીમાં વાંચવા માંગતા હો તો અમારી વેબસાઈટ પર જાઓ

Polish Jeśli chcesz przeczytać ten list w innym języku, przejdź na naszą stronę.

Punjabi ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਇਸ ਪੱਤਰ ਨੂੰ ਕਿਸੇ ਹੋਰ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਪੜ੍ਹਨਾ ਚਾਹੁੰਦੇ ਹੋ ਤਾਂ ਸਾਡੀ ਵੈੱਬਸਾਈਟ 'ਤੇ ਜਾਓ

Somali Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku akhrido warqadan luuqad kale, booqo boggayaga internetka

Urdu اگر آپ اردو میں یہ خط پڑھنا چاہتے ہیں تو ہماری ویب سائٹ پر جائیں۔

Haddii aad jeclaan lahayd inaad luqad kale ku akhrido xaashida tallaalka HPV, booqo:

<https://www.gov.uk/government/publications/hpv-vaccine-vaccination-guide-leaflet>

Luuqadaha la heli karo waxaa ka mid ah: Ingiriis, Albanian, Carabi, Bengali, Boortaqiis, Bulgaariya, Shiinees, Istooniyaan, Farsi, Giriig, Gujarati, Hindi, Latvia, Lithuanian, Banjabi, Polish, Romaniyan, Romany, Ruush, Soomaali, Isbaanish, Turki, Twi, Yukreeniyaan, Urduu iyo Yiddish.

Waxa sidoo kale looga heli karaa mareegta asaga oo muuqaal ahaan ah Luqadda Calaamadaha Ingiriiska (BSL).